



Koorsooyinka Af Iswiidhiska sidii Luqad Labbaad (SAS)

Ma rabtaa in aad horumariso Af Iswiidhiskaaga? Markaa waxaanu kuu haynaa koorsooyinka. Af Iswiidhiska sidii Luqad Labbaad waxa uu siiyaa dadka aan u lahayn Af Iswiidhiska sidii luqad ay u dhasheen fursad ay ugu kobcinaay xirafaddahooda ku xidhiidhka Af Iswiidhishka.

Kalsoonida luqaddeed ayaa horumarta si loo helo xirfad cusub, waxbarasho dheeraad ah iyo ka qayb qaadasho firfircoon bulshadda iyo nololsha shaqada. Sidoo kale luqadda weeye tan aanu ku caddayno shakhsiyadayada oo aanu ku dhexgalno xaaladaha kale ee kala duwan.

Ku saabsan Af Iswiidhishka sidii Luqad Labbad

Duruusta Af Iswiidhishkayaga sidii kooraska Luqad Labbaad waxay horumarisaa Af Iswiidhishkaaga iyo xirfadaha bulshadda. Waxaad heli doontaa fursadda aad ku horumariso dhinac kasta oo xirfadaha wada xidhiidhka ah. Taas macnaheedu waxa weeye in aad fahmi doonto in aad naftaada ku xaqijiso oo aad kuwa kale ku dhex gasho hadal iyo qoraal, siiba aad ku habboonaysiiso luqaddaada xaalado kala duwan, ujeedooyin iyo dhegaystayaal.

Waxaad haysan doontaa fursadda aad ku horumariso aqoontaada duraafaha nololsha, arrimaha bulshadda iyo muuqaalada dhaqaneed ee diyaar garaynaha halka Af Iswiidhishka laga isticmaalo.

Muxuu koorasku kuu hogaamiyaa?

Koorsadu waxay kaa caawinaysaa in aad xoogayso aqoonsigaaga luqad badnida ah oo aad kobciso kalsoonida luqaddahaaga xirfaddaha, marka ay ku siinayaan tixgelin la kordhiyay oo ah luqaddaha kuwa kale iyo hababka ay ku cabbiraan nafahooda. Koorsadan waxay horumarisaa kartidaada:

- Fahanka Af Iswiidhishka qoran iyo ka lagu hadlo oo fasirtaa waxa ay ka koobantahay.
- Ku cabbirtaa naftaada oo kula xidhiidhaa Af Iswiidhishka qoran iyo ka lagu hadlo.
- Isticmaashaa farsamooyinka luqaddeed oo caawisaa macnayaal guud oo kala duwan.
- Ku habboonaysiisa luqaddaada ujeedoouon kala duwan, dhegaystayaal iyo xaalado.
- Falanqaysaa oo muujisaa duruufaha nolosha, arrimaha bulshadda iyo muuqaalada dhaqaneed macnayaal guud oo kale duwan iyo goobaha luqadda Iswiidhiska laga isticmaalo.

Yaa loogu talo galay koorsada?

Koorsadu waxay ku habboontahay dadka doonaya in ay ogaadaan in badan oo ku saabsan dhaqanka iyo luqadda, oo haysta fursada ay in dheeraada ku sii kobciyaan kartiyaha luqada badnida, maxaayeelay aqoonta luqaddo kala duwan waxay caawisaa in ay balaadhiso xirfadahaaga gebi ahaanba.

Aqoontee hore ayaan u baahanahay?

Waxba.

Sababteen u dooranayaa Eductus?

- Koorsadu aday kugu koobanyahay, shuruudahaaga, kartiyahaaga iyo baahiyahaaga.
- Waxaanu ku siinaa habka ugu degdega badan ee aad ugu wanaagsanaato Luqadda Iswiidhiska.
- Waanu oganahay waxa habboon!

Waxaanu ku bixinaa koorsooyinka soo socda Af Iswiidhish sidii Luqad Labbaad:

- [Af Iswiidhis ah sidii Luqad Labbaad -\(SASG\)](#)
- [Af Iswiidhis ah sidii Luqad Labbaad 1 \(heer dhexe\)](#)
- [Af Iswiidhis ah sidii Luqad Labbaad 2 \(heer dhexe\)](#)
- [Af Iswiidhis ah sidii Luqad Labbaad 3 \(heer dhexe\)](#)

(Ogow: Hadda waxaa dib laguugu hagaajinayaa boggag Af Iswiidhish ah.)

Sida loo codsado

Waxaad ka codsataa adoo maraya adeega waxbarashada dadka waa wayn ee degmadda taas oo aad ku nooshahay.